



THE FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
OFFICE OF STATE ATTORNEY GENERAL

SUMMAD: XGG/233/2025

28/07/2025

Ku: Agaasimaha Golaha Wasiirrada
Ku: Wasaaradda Isagaarsiinta & Teknolojiyada
Og: Xafiiska Ra'iisul-wasaaraha Xukuumadda JFS

Muqdisho
Muqdisho
Muqdisho

Ujeeddo: Talo Sharci

Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dawladda oo tixraacaya Warqadda SUMMAD: WCAD/XAWSHH/2136/2025, ee ku taariikheysan 06/05/2025, Ujeeddadeeduna ahayd: Soo-gudbin "Hindise-Sharciyeedka Dembiyada Saybarka", kana soo baxday Wasaaradda Cadaaladda iyo Arrimaha Dastuurka.

Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dawladda, asaga oo gudanaya waajibaadkiisa shaqo si waafaqsan Xeer Lr. 18 ee 29 Jannaayo 1976, ayaa waxa uu halkan idiinkugu soo gudbinayaa "Hindise-sharciyeedka Sharciga Dembiyada Saybarka" oo Wasaaradda Cadaaladda horay ugu soo gudbiyay Xafiiska Garyaqaanka Guud, si uu uga guto waajibaadkiisa Shaqo, uguna bixiyo Talo Sharci.

Sidaa darteed, Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dawladda markuu darsay Hindise-sharciyeedkan oo ah mid mudnaan gaar ah u leh dembiyada lagu galo Saybarka iyo sidii looga hortagi lahaa, waxa uu ku talinayaa in loo gudbiyo Golaha Wasiirada si ay u meel-mariyaan, maadaama uu waafaqsan yahay Dastuurka iyo Shuruucda kale ee Dalka, kadib marka la dhammeystiro habraaca uu tilmaamayo Xeer Ra'iisul-wasaare Lr. 125 ee soo baxay 06/04/2023.

Ugu dambeen, Xafiiska Garyaqaanka Guud waxa uu ku wargelinayaa Agaasimaha Golaha Wasiirrada iyo Wasaaradda Isagaarsiinta in Nuqulka ku lifaaqan warqaddan uu yahay nuqulka asalka ah ee loo gudbinayo Golaha Wasiirada si ay u meel-mariyaan, maadaama Xafiiska Garyaqaanka Guud uu ku sameeyay wax ka beddel qodobka 17, Cutubka Todobaad iyo Qodobbada 35, 36 ee Hindise-sharciyeedkan oo lagu sameeyay turxaan bixin iyo hagaajin kadib markii uu kala tashaday Wasaaradda Isagaarsiinta iyo Teknolojiyadda saxitaan iyo toosin nuqulkii ay Wasaaradda Cadaaladdu horay u soo gudbisay.

FG: Halkaan waxaa ku lifaaqan Hindise-sharciyeedka Sare ku xusan.

Salaan qadarin leh

Avv: Aadan Dacar Maadey
Ku-xigeenka Garyaqaanka Guud ee Dawladda





Federal Republic of Somalia
Ministry of Justice and Constitutional Affairs
Office of Director Legislations and Agreements Department

SUMMAD: WCAD/XAWSHH/2136/2025

Tr. 06/05/2025

Mudane Garyaqaan,

UJEEDDO: SOO-GUDBIN HINDISHE-SHARCIYEEDKA DEMBIYADA SAYBARKA

Wasaaradda Cadaaladda iyo Arrimaha Dastuurka, waxay halkan ku soo gudbinaysaa “Hindise-sharciyeedka Dembiyada Saybarka” oo ay diyaarisay Wasaaradda Isgaarsiinta iyo Teknoolojiyadda, Xukuumadda JFS.

Hindise-sharciyeedkani wuxuu qeyb weyn ka qaadanayaa ka-hortagga dembiyada lagu geysto saybarka iyo ka-hortagga isticmaalka sharci-darrada ah ee nidaamyada kombiyuutarka.

Haddaba, waxaan Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dawladda ka codsanaynaa in uu waajibkiisa sharci ee ku aaddan hindise-sharciyeedyada ka guto, si habraaca ansixintu u dhammeystirno.

Wada-shaqeyn Wacan.

Mudane Xasan Axmed Cali
Agaasimaha Waaxda Sharciyada iyo Heshiisyada,
Wasaaradda Cadaaladda iyo Arrimaha Dastuurka


Garyaqaanka Guud ee Dawladda
Og: Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Cadaaladda & Arr. Dastuurka
Og: Xoghayaha Joogtada ah ee Wasaaradda Cadaaladda & Arr. Dastuurka
Og: Wasiir Ku-xigeenka Wasaaradda Cadaaladda & Arr. Dastuurka
Og: Wasiiru-dawlaha Wasaaradda Cadaaladda & Arr. Dastuurka
Og: Wasiirka Wasaaradda Cadaaladda & Arr. Dastuurka


=Muqdisho=
=Muqdisho=
=Muqdisho=
=Muqdisho=
=Muqdisho=
=Muqdisho=

Address: Martine Hospital Road, Mogadishu – Somalia.
Email: legislative@moj.gov.so

Tell: 0615847146

Dr. Daqar
Dr. Jibril
7/05/2025





**JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
WASAARADDA ISGAARSIINTA IYO TEKNOOLOJIYADDA**

HINDISE-SHARCIYEEDKA SHARCIGA DEMBIYADA SAYBARKA SOOMAALIYA

Tusmo:

CUTUBKA KOWAAD: QODOBBO GUUD	1
Qodobka 1 ^{aad} : Magaca Sharciga	1
Qodobka 2 ^{aad} : Qeexid.....	1
Qodobka 3 ^{aad} : Ujeeddoooyinka Sharciga	2
Qodobka 4 ^{aad} : Baaxadda Sharciga.....	3
CUTUBKA LABAAD: DEMBIYADA TOOSKA AH (SUBSTANTIVE OFFENCES).....	4
Qodobka 5 ^{aad} : Gelid Aan Oggolaansho Loo Haysan	4
Qodobka 6 ^{aad} : Gelid Aan Oggolaansho Loo Haysan, Ujeedkuna Yahay Geysashada Fal- dembiyeed	4
Qodobka 7 ^{aad} : Jid-gooyo Danabeysan (Electronic).....	4
Qodobka 8 ^{aad} : Faro-gelin Xogeed oo Aan Oggolaansho Loo Haysan	5
Qodobka 9 ^{aad} : Faro-gelin Aan Oggolaansho Loo Haysan, Oo Lagu Sameeyo Nidaam Kombiyuutar	5
Qodobka 10 ^{aad} : Ku Xad-gudubka Aaladaha Teknoolojiyadda iyo Fureyaasha ama Koodhadh-ka Gelidda.....	6
Qodobka 11 ^{aad} : Haysashada Xog ama Aalad Kale oo Ujeeddaduna Tahay in Lagu Geysto ama Lagu Fududeeyo Dembi.....	6
CUTUBKA SADDEXAAD: DEMBIYADA LA XIRIIRA KOMBIYUUTARKA	7
Qodobka 12 ^{aad} : Been-abuurka La Xiriira Kombiyuutarka	7
Qodobka 13 ^{aad} : Khiyaamooyinka La Xiriira Kombiyuutarka.....	7
Qodobka 14 ^{aad} : Ku xad-gudubka Xuquuqaha Maaliyadeed Iyadoo Loo Marayo Saybarka	8
Qodobka 15 ^{aad} : Ku xad-gudubka Khusuusiyaadka iyo Tacaddiyada Ka Dhaca Saybarka	8
Qodobka 16 ^{aad} : Faafinta Beenta iyo Marin-habaabinta	9
CUTUBKA AFARAAD: DEMBIYADA LA XIRIIRA ANSHAXA.....	9
Qodobka 17 ^{aad} : Baahinta Nuxurka Xogeed ee Muujinaya Waxyaabo Anshaxa Ka Baxsan....	9
CUTUBKA SHANAAD: MAS’UULIYADDA DEMBI-KU-KAALMEYNTA	10
Qodobka 18 ^{aad} : Ku-kaalmayn, Ku-Dhiirrin ama Iskuday Gelid Dembi	10
Qodobka 19 ^{aad} : Dembiyada Shirkadaha ay Galaan.....	10
CUTUBKA LIXAAD: AWOODAHA HAB-RAACA.....	11
Qodobka 20 ^{aad} : Baaxadda Qodobbada Hab-raaca.....	11
Qodobka 21 ^{aad} : Dhawrista Sharciga	11
Qodobka 22 ^{aad} : Ilaalinta Xogta Kombiyuutarka ee Keydsan	11
Qodobka 23 ^{aad} : Dhawrista iyo Shaacinta Qulqulka Xogta	12
Qodobka 24 ^{aad} : Soo-saaridda Amarrada	12
Qodobka 25 ^{aad} : Baaritaan iyo La-wareegid	13
Qodobka 26 ^{aad} : Qabashada Qulqulka Xogta ee Waqtiga Dhabta ah (Real-time Collection of Traffic Data)	14
Qodobka 27 ^{aad} : Dhex-galka Xogta Isgaarsiinta	15

CUTUBKA TODDOBAAD: ISKAASHIGA GARSOORKA CAALAMIGA AH	16
Qodobka 28 ^{aad} : Is-gargaarsiga Sharciyeed iyo Dhiibidda Dembiileyaasha (MLA and Extradition of Criminal Offenders)	16
Qodobka 29 ^{aad} : Xog aan Gudbinteeda Hore loo Qorsheyn	17
Qodobka 30 ^{aad} : Ilaalinta Sirta iyo Xaddididda Adeegsigeeda.....	17
Qodobka 31 ^{aad} : Dhaqso-u-xafididda Xog Kombiyuutar ee Qaran Codsado.....	18
Qodobka 32 ^{aad} : Degdeg-u-bixinta Qulqul Xogeed oo La Keydiyey	19
Qodobka 33 ^{aad} : Iskaashi La Xiriira Gelidda Xog Kombiyuutar ku Keydsan	19
Qodobka 34 ^{aad} : Gelidda Xog Caam Ah Ama Oggolaansho Ku Gelidda Xog Kombiyuutar Ku Keydsan.....	19
Qodobka 35 ^{aad} : Iskaashiga Ururinta Waqtiga Dhabta ah ee Qulqulka Xogta	20
Qodobka 36 ^{aad} : Iskaashiga Ururinta Waqtiga Dhabta ah ee Nuxurka Xogta	20
CUTUBKA SIDEEDAAD: QODOBO QUBANE AH.....	21
Qodobka 37 ^{aad} : Awoodda Soo-Saarista Xeer-nidaamiyeyaal.....	21
Qodobka 38 ^{aad} : Baabi'in	21
Qodobka 39 ^{aad} : Dhaqan-gal	21

**CUTUBKA KOWAAD:
QODOBBO GUUD**

**Qodobka 1^{aad}:
Magaca Sharciga**

Sharcigan waxaa lagu magacaabaa “Sharciga Dembiyada Saybarka Soomaaliya”.

**Qodobka 2^{aad}:
Qeexid**

Haddii aan si kale loogu qeexin Sharcigan gudihiisa, ereyadan soo socda wuxuu mid walba yeelanayaa macnaha ku hor qoran:

“Sarkaal Idman” waxaa loola jeedaa sarkaal boolis, Xeer-ilaaliye ama qof kasta oo awood u leh fulinta amarrada maxkamadaha iyo fulinta waajibaadka ku xusan sharcigan.

“Shirkad” waxaa loola jeedaa si waafaqsan macnaha uu u asteeyey Qodobka 1^{aad} ee Xeerka Shirkadaha Soomaaliya (Xeer Lr. 18/2019, Xeerkaan).

“Dembi Saybar” waxaa loola jeedaa xad-gudub kasta oo ku lug leh isticmaalka kombiyuutaro, shabakado macluumaad ama internet, kaasoo fal-dembiyeed ku ah Qodobbada Sharcigan.

“Gelitaan aan la oggolaayn” waxaa loola jeedaa gelitaan kasta oo si ula-kac ah qof ugu sameeyo kombiyuutar, nidaam macluumaad, shabakad macluumaad, website ama khusuusiyaadka Dhijitaalka ah ee cid kale leedahay, iyadoo aan fasax laga haysan cidda leh.

“Kombiyuutar” waxaa loola jeedaa qalab kasta oo danabeysan (Electronic) ama bir-labaysan (magnetic) oo awood u leh in uu habeeyo, keydiyo, soo saaro ama gudbiyo xogta oo ay ku jiraan kombiyuutarada caadiga ah, teleefannada, adeegeyaasha iyo shabakadaha fududeeya isgaarsiinta dhijitaalka ah iyo maareynta xogta.

“Xog Kombiyuutar” waxaa loola jeedaa macluumaad kasta oo dhijitaal ah, taasoo la keydin karo, la isticmaali karo ama lagu gudbin karo kombiyuutar ama qalab kale oo dhijitaal ah.

“Nidaam Kombiyuutar” waxaa loola jeedaa aalad kasta ama qeyb ka mid ah aalado isku xiran ama xiriir leh, kuwaasoo mid ama in ka badan oo ka mid ahi, si toos ah (automatic) u socodsiiya xog.

“Maxkamad” waxaa loola jeedaa macnaha uu u asteeyey Qodobka 3aad ee Xeerka Habka Cigaabta Soomaaliyeed (XHCS).

“Habka Kaydka Xogta Kombiyuutarka” waxaa loola jeedaa wax kasta oo ka kooban ama loo qaabeeyey in lagu keydiyo xogta kombiyuutarka si loogu isticmaalo nidaam kombiyuutar.

“Nuxurka Xogtu Ka Koobantahay” waxaa loola jeedaa walxaha ama nuxurka xogtu

ka kooban tahay.

"Xog" waxaa loola jeedaa nooc kasta oo macluumaad ah.

"Wasiir" waxaa loola jeedaa Wasiirka Wasaaradda Isgaarsiinta iyo Teknoolojiyadda, Xukuumadda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

"Adeeg-bixiye" waxaa loola jeedaa:

- a) Shakhsi ama hay'ad dawladeed ama mid gaar ah oo isticmaalayaasha siiya adeeg ay ku wada xiriiri karaan iyadoo la adeegsanayo aaladaha teknoolojiyadda;
- b) Shakhsi ama hay'ad dawladeed ama mid gaar loo leeyahay oo gudbiya ama keydiya xog kombayutar iyagoo wakiil ka ah adeeg-istaarsiineed ama isticmaalayaasha adeeggaas; ama
- c) Shatila ama adeeg-bixiye haysta rukhsad si waafaqsan Sharciga Istaarsiinta Qaranka.

"Sarkaal Boolis Ah" waxaa loola jeedaa macnaha uu u asteeyey Qodobka 23aad ee Xeerka Habka Cigaabta Soomaaliyeed (XHCS).

"Xogta Macmiilka" waxaa loola jeedaa xog kasta oo adeeg-bixiye ka hayo macmiilka adeeggaas, lagana heli karo astaamaha soo socda:

- a) Nooca adeegga istaarsiinta ee la isticmaalay, tillaabooyinka farsamo ee loo maray bixinta adeeggaas iyo muddada adeegga;
- b) Aqoonsiga macmiilka, cinwaanka boosto ama goob juqraafi, lambar teleefan ama lambarka kale ee laga heli karo, sumadda biilka iyo macluumaadka lacag-bixinta, ee la heli karo iyadoo lagu salaynayo heshiiska adeegga ama hab kale ee dhinacyadu isku raaceen; ama
- c) Xog kasta oo kale oo ku saabsan goobta lagu rakibay qalabka loo isticmaalayo bixinta adeegga iyadoo lagu saleynayo heshiiska adeegga ama hab kale oo dhinacyadu isku raaceen.

"Qulqulka Xogta" waxaa loola jeedaa xog kasta oo kombuyuutar la isuguna gudbiyey hab kombuyuutar ama aaladaha kale ee teknoolojiyadda, taasoo qeyb ka ah silsiladda istaarsiinta oo ay ka mid tahay halka ay xogtu ka timid, halka ay ku socoto, dariiqa ay martay, waqtiga, taariikhda, xajmiga istaarsiinta, muddada ama nooca gaarka ah ee istaarsiintaasi tahay.

"JFS" waxaa loola jeedaa Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

Qodobka 3aad: Ujeeddooyinka Sharciga

Ujeeddooyinka sharcigani waa:

- a) Ilaalinta sirta, bed-qabka iyo amniga nidaamyada kombiyuutarka, shabakadaha iyo barnaamijyada;
- b) Ka-hortagga isticmaalka sharci-darrada ah ee nidaamyada kombiyuutarka;
- c) fududeeynta ka hortagga, oggaanshaha, baarista, dacwad ku oogidda iyo ciqaabidda dembiyada saybarka;

- d) Ilaalinta danta guud, akhlaaqda, iyo qiyamka guud ee bulshada;
- e) Ilaalinta dhaqaalaha qaranka iyo sidoo kale kaabayaasha macluumaadka ee muhiimka ah; iyo
- f) Fududaynta wada-shaqeynta iskaashiga caalamiga ah ee arrimaha ku xusan Sharcigan.

**Qodobka 4^{aad}:
Baaxadda Sharciga**

(1) Sharcigani wuxuu khuseeyaa dembiyada lagu magacaabay ama lagu tilmaamay sharcigan:

- a) Haddii falka dembigu ka dhalanayo ama fal la'aanta dembigu ka dhalanayo tahay mid lagu galay:
 - i. Gudaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya;
 - ii. Markab wata calanka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya;
 - iii. Diyaarad ka diiwaan-gashan Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya iyo safaaradaha JFS; ama
 - iv. Hadduu geystay fal-dembiyeedka muwaadin u dhashay Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya ama qofkasta oo ku nool geyiga JFS ama shirkad ka diiwaan-gashan Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya; ama
- b) Haddii dembiga ciqaabtiisu ay hoos-timaado xeerka ciqaabta ee goobta fal-dembiyeedku ka dhacay ama haddii fal-dembiyeedku ka dhacay meel ka baxsan xayndaabka sharciyeed ee Qaran kasta; ama
- c) Iyadoo aan la eegayn goobta falka dembigu ka dhalanayo ama fal-la'aanta dembigu ka dhalanayo tahay gudaha ama dibadda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya; haddii:
 - i. Laga galay cid leh shakhsiyad qaanuuneed oo hoos timaadda sharuucda Jamhuuriyadda Federaalka ee Soomaaliya;
 - ii. Uu geystay qof kusugan gudaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, marka fal-dembiyeedku dhacay ka dib;
 - iii. la qorsheeyey in dembiga lagu galo gudaha Jamhuuriyadda Federaalka ee Soomaaliya; ama ka bilowday ama ku hakaday gudaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

(2) Waxaa la dabaqi karaa sharcigan, marka la waafajiyo habka baarista tuhumada dembiyada ee ku xusan faqradda (1) ee qodobkan.

**CUTUBKA LABAAD:
DEMBIYADA TOOSKA AH (SUBSTANTIVE OFFENCES)**

**Qodobka 5^{aad}:
Gelid Aan Oggolaansho Loo Haysan**

- (1) Cidda si ula kac ah ugu gasha agabka Teknoolojiyadda Casriga si joogta ah ama muddo kooban, guud ahaan ama qeyb ka mid ah agabkaas, iyadoo aan oggolaansho u haysan waxay gelayaa dembi.
- (2) Dembiga hoos yimaadda qodobkan waxaa lagu mutaysanayaa ciqaab, marka la isku helo:
 - a) Haddii uu shakhsi geystay, waxaa lagu xukumayaa xabsi muddo aan ka badnayn 3 (saddex) sano ama ganaax lacageed oo aan ka badnayn 5,000 (shan kun) oo Doollarka Mareykanka ah ama Shillin Soomaali u dhigma, ama labadaba; ama
 - b) Haddii ay shirkadi geysatay, waxaa lagu xukumayaa ganaax lacageed oo aan ka badnayn 70,000 (todobaatan kun) oo Doollarka Mareykanka ah ama Shillin Soomaali u dhigma.

**Qodobka 6^{aad}:
Gelid Aan Oggolaansho Loo Haysan, Ujeedkuna Yahay Geysashada Fal-dembiyeed**

1. Qofku wuxuu gelayaa dembi sida ku cad qodobkan, haddii uu:
 - a) Galo dembiyada ku cad qodobka 5^{aad} ee sharcigan; iyo
 - b) Oggolaansho la'aan galo agabyada Teknoolojiyadda Casriga ah, iyo in ujeeddadu tahay qorsheynta, geysashada ama fududeeynta fal-dembiyeed.
2. Sida ku cad qodobkan qofku wuxuu gelayaa dembi:
 - a) Haddii aanay suuragal ahayn in uu galo dembi kale; ama
 - b) Haddii fal-dembiyeedka la galay xilliga lagu gudo-jiro gelitaanka oggolaansho la'aanta ah ama waqti kale oo dambe sida ku cad qodobka 5^{aad} ee sharcigan.
3. Dembiyada hoos yimaada qodobkan waxaa lagu mutaysanyaa ciqaab, marka la isku helo:
 - a) Haddii shakhsi geystay xad-gudubka, waxaa lagu xukumayaa xabsi muddo aan ka badnayn 5 (shan) sano ama ganaax lacageed oo aan ka badnayn 8,000 (sideed kun) oo Doollarka Mareykanka ah ama Shillin Soomaali u dhigma, ama labadaba; ama
 - b) Haddii ay shirkadi geysatay xad-gudubka, waxaa lagu xukumayaa ganaax aan ka badnayn 100,000 (boqol kun) oo Doollarka Mareykanka ah ama Shillin Soomaali u dhigma.

**Qodobka 7^{aad}:
Jid-gooyo Danabeysan (Electronic)**

1. Qofku wuxuu gelayaa dembi hadduu fasax la'aan, si ku tala-gal ah ugu sameeya xog aan caam ahayn jid-gooyo danabeysan (elektaroonik ah), xogtaasoo la isugu gudbinayey aaladaha teknoolojiyadda.

2. Dembiyada hoos yimaada qodobkan waxaa lagu muteysanayaa ciqaab, marka la isku helo:
 - a) Haddii shakhsi geystay, waxaa lagu xukumayaa ganaax aan ka badnayn 10,000 (Toban kun) oo Doollarka Mareykanka ah ama lacag shillin Soomaali ah oo u dhiganta ama xabsi muddo aan ka badnayn 5 (shan) sano ama labadaba; ama
 - b) Haddii ay shirkadi geysatay, waxaa lagu xukumayaa ganaax aan ka badnayn 100,000 (Boqol kun) oo Doollarka Mareykanka ah ama lacag shillin Soomaali ah oo u dhiganta.

Qodobka 8^{aad}:

Faro-gelin Xogeed oo Aan Oggolaansho Loo Haysan

1. Qofku wuxuu gelayaa dembi, haddii uu amar la'aan si ku-talo-gal ah u geysto burburin, jabin, tirtirid, kharribid, wax-ka-beddelid ama xakameyn xog kombiyuutar ama aaladaha kale ee teknoolojiyadda.
2. Dembiyada hoos yimaada qodobkan waxaa lagu mutaysanaa ciqaab, marka la isku helo:
 - a) Haddii shakhsi geystay, waxaa lagu xukumayaa xabsi muddo aan ka badnayn 10 (toban) sano ama ganaax lacageed oo aan ka badnayn 20,000 (labaatan kun) oo Doollarka Mareykanka ah ama Shillin Soomaali u dhigma, ama labadaba; ama
 - b) Haddii ay shirkadi geysatay, waxaa lagu xukumayaa ganaax aan ka badnayn 300,000 (saddex boqol kun) oo Doollarka Mareykanka ah ama Shillin Soomaali u dhigma.

Qodobka 9^{aad}:

Faro-gelin Aan Oggolaansho Loo Haysan, Oo Lagu Sameeyo Nidaam Kombiyuutar

1. Qofku wuxuu gelayaa dembi hadduu oggolaansho la'aan, si ku-talo-gal ah faro-gelin ugu sameeyo habsami-u-shaqeynta nidaam kombiyuutar.
2. Ujeeddada qodobkan waa "faro-gelin lagu sameeyo habsami-u-shaqeynta nidaam kombiyuutar" waxaa ka mid ah falalka soo socda, kumase koobna intaan:
 - a) Wax-ku-darid, gudbin, waxyeelayn, tirtirid, xumayn, beddelid ama xakamayn xog kombiyuutar;
 - b) Ka-jaridda tamarta korantada ee nidaamka kombiyuutar;
 - c) Sababid faro-gelin danabeysan oo bir-labaysan (electromagnetic) ah oo lagu sameeyo nidaam kombiyuutar; iyo
 - d) Carqaladayn ama kharribaad nidaam kombiyuutar nooc kasta oo ay noqotoba.
3. Dembiyada hoos yimaad qodobkan waxaa lagu mutaysanayaa ciqaab, marka la isku helo:
 - a) Haddii shakhsi geystay, waxaa lagu xukumayaa xabsi muddo aan ka badnayn 10 (toban) sano ama ganaax lacageed oo aan ka badnayn \$20,000 (labaatan kun) oo Doollarka Mareykanka ah ama Shillin Soomaali u dhigma, ama labadaba; ama
 - b) Haddii ay shirkadi geysatay, waxaa lagu xukumayaa ganaax lacageed oo aan ka badnayn \$300,000 (saddex boqol kun) oo Doollarka Mareykanka ah ama Shillin Soomaali u dhigma.

Qodobka 10^{aad}:
Ku Xad-gudubka Aaladaha Teknoolojiyadda iyo Fureyaasha ama Koodhadh-ka Gelidda

1. Qofku wuxuu gelayaa dembi haddii uu:
 - a) Soo saaro, iibiyo, qeybiyo, soo degsado, faafiyo, shaaciyo, ama si kale u fududeeyo helitaanka:
 - i. Aalad sida barnaamij kombiyuutar oo looga gol-leeyahay in lagu geysto dembiyada ku cad Qodobbada 5^{aad} ilaa 9^{aad} ee sharcigan; ama
 - ii. Lambar sireedka kombiyuutar, koodh-ka gelitaanka ama xogaha la mid ka ah kuwaas oo gebi ahaan ama qeyb ahaan suuragelinaya gelitaanka nidaam kombiyuutar; iyo
 - b) Ujeeddada ficilalladaas loo sameeyeyna tahay geysashada ama fududeynta dembiyada ku cad Qodobbada 5^{aad} ilaa 9^{aad} ee sharcigan.
2. Ficilada lagu sifeeyey faqradda (1) ee qodobkan ma noqon doonaan dembi haddii:
 - a) Loogu talo-galay tababar la oggolaaday, tijaabin ama ilaalinta amniga nidaam kombiyuutar; ama
 - b) Isticmaalka barnaamij kombiyuutar ama lambar-sireedka kombiyuutar, koodh-ka gelitaanka ama xogaha la midka ah waxaa loo marayaa amar maxkamadeed ama fulinta awoodaha sharcigan ama sharci kale ee dalka dhaqan-gal ka ah.
3. Dembiyada hoos yimaada qodobkan waxaa lagu mutaysanaa ciqaab, marka la isku helo:
 - a) Haddii shakhsi geystay, waxaa lagu xukumayaa xabsi muddo aan ka badnayn 10 (toban) sano ama ganaax lacageed oo aan ka badnayn \$20,000 (labaatan kun) oo Doollarka Mareykanka ah ama Shillin Soomaali u dhigma, ama labadaba; ama
 - b) Haddii ay shirkadi geysatay, waxaa lagu xukumayaa ganaax lacageed oo aan ka badnayn \$300,000 (saddex boqol kun) oo Doollarka Mareykanka ah ama Shillin Soomaali u dhigma.

Qodobka 11^{aad}:
Haysashada Xog ama Aalad Kale oo Ujeeddaduna Tahay in Lagu Geysto ama Lagu Fududeeyo Dembi

1. Qofku wuxuu gelayaa dembi, hadduu:
 - a) Haysto ama uu hago aaladaha ama xogaha ku cad Qodobka 10^{aad} (1)(b); iyo
 - b) Qorsheeyo geysashada dembi ama fududeynta dembiyada ku cad Qodobbada 5^{aad} ilaa 9^{aad} ee sharcigan.
2. Ujeeddada haysashada ama hagidda xogaha ee qodobkani tilmaamayo waxaa ka mid ah:
 - a) Haysashada ama hagidda nidaam kombiyuutar ama aaladaha xog-keydinta kombiyuutarka; iyo
 - b) Haysashada ama hagidda dokumiinti xog ku keydsan tahay.
3. Qofka waxaa lagu heli karaa dembi xitaa haddii aanay suurta-gal ahayn geysashada dembiga ku cad faqradda (1)(b) ee qodobkan.
4. Dembiga ka dhanka ah faqradda (1) ee qodobkan lagu mutaysanayo ciqaab, marka la isku helo:
 - a) Haddii shakhsi geystay, waxaa lagu xukumayaa xabsi muddo aan ka badnayn 5 (shan) sano ama ganaax lacageed oo aan ka badnayn \$10,000

- (toban kun) oo Doollarka Mareykanka ah ama Shillin Soomaali u dhigma, ama labadaba; ama
- b) Haddii ay shirkadi geysatay, waxaa lagu xukumayaa ganaax aan ka badnayn \$150,000 (boqol iyo konton kun) oo Doollarka Mareykanka ah ama Shillin Soomaali u dhigma.

**CUTUBKA SADDEXAAD:
DEMBIYADA LA XIRIIRA KOMBIYUUTARKA**

**Qodobka 12^{add}:
Been-abuurka La Xiriira Kombiyuutarka**

1. Qofku wuxuu gelayaa dembi haddii uu:
 - a) Si ku-talo-gal ah u sameeyo wax-ku-darid, beddelid, tirtirid, ama uu xanibo xog kombiyuutar, taasoo keeni karta isbedel ku yimaada sax ahaanshaha xogta; iyo
 - b) Iyadoo ujeeddada sidaas loo sameeyey ay tahay in loo qaato ama loo adeegsado ujeeddo sharci, sida in ay tahay xog sugan.
2. Dembiga qodobkan ku cad ayaa dhici kara iyadoo aan loo eegin in xogtu tahay mid si toosa loo aqrin karo ama loo fahmi karo iyo in kale.
3. Dembiyada ku cad qodobkan waxaa lagu mutaysanaa ciqaab, marka la isku helo:
 - a) Haddii shakhsi geystay, waxaa lagu xukumayaa xabsi muddo aan ka badnayn 10 (toban) sano ama ganaax lacageed oo aan ka badnayn \$20,000 (labaatan kun) oo Doollarka Mareykanka ah ama Shillin Soomaali u dhigma, ama labadaba; ama
 - b) Haddii ay shirkadi geysatay, waxaa lagu xukumayaa ganaax lacageed oo aan ka badnayn \$200,000 (labo boqol kun) oo Doollarka Mareykanka ah ama Shillin Soomaali u dhigma.

**Qodobka 13^{aad}:
Khiyaamooyinka La Xiriira Kombiyuutarka**

1. Qofku wuxuu gelayaa dembi, haddii uu:
 - a) Si ku-talo-gal ah u kallifo in qof kale hanti waayo, taasoo ka dhalatay:
 - i. wax-ku-darid, wax-ka-beddelid, tirtirid ama xanibid lagu sameeyey xog kombiyuutar; ama
 - ii. Faro-gelin kasta oo lagu sameeyo shaqada nidaamka kombiyuutarka; iyo
 - b) falkaas u sameeyo si khiyaano ah ama dhagrid ah ama daacad-darro ah, kuna doonayo dhaqaale shakhsiyeed uu nafsadiisa u raadinayo ama mid uu qof kale u raadinayo.
 - a) Dembiyada ku cad qodobkan waxaa lagu mutaysanaa ciqaab, marka la isku helo:
 - b) Haddii shakhsi geystay, waxaa lagu xukumayaa xabsi muddo aan ka badnayn 10 (toban) sano ama ganaax lacageed oo aan ka badnayn \$50,000 (konton kun) oo Doollarka Mareykanka ah ama Shillin Soomaali u dhigma, ama labadaba;
 - c) Haddii ay shirkadi geysatay, waxaa lagu xukumayaa ganaax aan ka badnayn \$200,000 (labo boqol kun) oo Doollarka Mareykanka ah ama Shillin Soomaali u dhigma; ama

- d) Maxkamadu iyadoo eegeysa mugga maaliyadeed ama hantiyeed waxay dhibanaha u xukumi kartaa mag-dhaw u dhigma khasaaraha soo gaaray markuu dhibanuhu codsado.

Qodobka 14^{aad}:

Ku xad-gudubka Xuquuqaha Maaliyadeed Iyadoo Loo Marayo Saybarka

1. Qofku wuxuu gelayaa dembi, haddii uu:
 - b) Isagoo adeegsanaya magac been-abuur ah, ama aqoonsi been-abuur ah, uu si ku-talo-gal ah u galo nidaamka banki ama kaarka banki ee qof kale leeyahay isagoo aan oggolaansho u haysan; ama
 - c) U sameeyo falkaas iyadoo ujeeddadu tahay in uu helo macluumaad ama dhaqaale ama adeegyo la soo bandhigay.
2. Dembiyada ku xusan faqradda (1) ee qodobkan waxaa ka dhalanaya in mag-dhaw la siiyo qofka uu dhibka soo gaaray, markuu codsado.
3. Dembiyada ku cad faqradda (1) ee qodobkan waxaa lagu mutaysanaa ciqaab, marka la isku helo:
 - a) Haddii shakhsi geystay, waxaa lagu xukumayaa xabsi muddo aan ka badnayn 5 (shan) sano ama ganaax lacageed oo aan ka badnayn \$10,000 (toban kun) oo Doollarka Mareykanka ah ama Shillin Soomaali u dhigma, ama labadaba; ama
 - b) Haddii ay shirkadi geysatay, waxaa lagu xukumayaa ganaax lacageed oo aan ka badnayn \$150,000 (boqol iyo konton kun) oo Doollarka Mareykanka ah ama Shillin Soomaali u dhigma.

Qodobka 15^{aad}:

Ku xad-gudubka Khusuusiyaadka iyo Tacaddiyada Ka Dhaca Saybarka

1. Qofku wuxuu gelayaa dembi, haddii:
 - a) Isagoo isticmaalaya nidaam isgaarsiineed sida baraha xiriirka bulshada, kombiyuutar, teleefan, shabakad ama aalad kale oo teknoolojiyadeed, si ku-talo-gal ah ugu gudba ama u jabsada macluumaad gaar ah oo uu leeyahay qof kale isagoo aan oggolaansho ama fasax u haysan; iyo
 - b) U sameeyo falkaas si uu ugu caga-jugleeyo ama u dhibaateeyo qofka leh macluumaadka isagoo ugu hanjabaya in uu ku sameynayo sumcad-dil, fadeexeyn ama qadaf haddii uusan u hoggaansamin shuruudo gaar ah sida in uu sameeyo fal gaar ah ama uu bixiyo lacag ama uu fuliyo dan kale oo aan xaq loogu lahayn.
2. Dembiyada ku cad faqradda (1) ee qodobkan waxaa lagu mutaysanaa ciqaab, marka la isku helo:
 - a) Dembiyada ku xusan faqradda (1) ee Qodobkan waxaa ka dhalanaya in mag-dhaw la siiyo qofka uu dhibka soo gaaray, markuu codsado.
 - b) Haddii shakhsi geystay, waxaa lagu xukumayaa xabsi muddo aan ka badnayn 5 (shan) sano ama ganaax lacageed oo aan ka badnayn \$10,000 (toban kun) oo Doollarka Mareykanka ah ama Shillin Soomaali u dhigma, ama labadaba; ama
 - c) Haddii ay shirkadi geysatay, waxaa lagu xukumayaa ganaax aan ka badnayn \$150,000 (boqol iyo konton kun) oo Doollarka Mareykanka ah ama Shillin Soomaali u dhigma.

Qodobka 16^{aad}:

Faafinta Beenta iyo Marin-habaabinta

1. Qofku wuxuu gelayaa dembi, haddii uu:
 - a) Isagoo isticmaalaya nidaam isgaarsiineed sida baraha xiriirka bulshada, kombiyuutar, shabakad, ama aalad kale oo teknoolojiyadeed si ku-talo-gal ah u faafiyo been, marin-habaabin ama xog been-abuur ah, iyadoo ujeeddadu tahay isku dir, kicin bulsho, kala-qeybin bulsho, aflagaado ama fuquuq, magac-dil ama sumcad-xumayn; ama
 - b) U sameeyo falkaas si uu ugu caga-jugleeyo ama u dhibaateeyo qofka leh macluumaadka isagoo ugu hanjabaya in uu ku sameynayo sumcad-dil, fadeexadayn ama qadaf haddii uusan u hoggaansamin shuruudo gaar ah sida in uu sameeyo fal gaar ah ama u bixiyo lacag ama u fuliyo dan kale oo aan xaq loogu lahayn.
2. Dembiyada ku cad faqradda (1) ee qodobkan waxaa lagu mutaysanaa cigaab, marka la isku helo:
 - a) Haddii shakhsi geystay, waxaa lagu xukumayaa xabsi muddo aan ka badnayn 5 (shan) sano ama ganaax lacageed oo aan ka badnayn \$20,000 (labaatan kun) oo Doollarka Mareykanka ah ama Shillin Soomaali u dhigma, ama labadaba; ama
 - b) Haddii ay shirkadi geysatay, waxaa lagu xukumayaa ganaax aan ka badnayn \$150,000 (boqol iyo konton kun) oo Doollarka Mareykanka ah ama Shillin Soomaali u dhigma.

CUTUBKA AFARAAD:

DEMBIYADA LA XIRIIRA ANSHAXA

Qodobka 17^{aad}:

Baahinta Nuxurka Xogeed ee Muujinaya Waxyaabo Anshaxa Ka Baxsan

1. Qofku wuxuu gelayaa dembi haddii uu si ku-talo-gal ah:
 - a) U soo saaro ama u baahiyo nuxur kasta oo anshax-xumo ah ama galmo ah, iyadoo ujeeddada laga leeyahay ay tahay in lagu faafiyo nidaamyada kombiyuutarka iyo baraha bulshadu ku xiriirto;
 - b) U bixiyo ama u fududeeyo in cid kale helo muuqaallo anshax- xumo ah, iyadoo lagu gudbinayo nidaamyada kombiyuutarka ama aaladaha kale ee casriga ah;
 - c) U faafiya ama u gudbiya muuqaallo anshax-xumo ah, iyadoo lagu gudbinayo nidaamyada kombiyuutarka ama aalada kale oo casri ah;
 - d) Ka ganacsada ama soo iibsada nuxur kasta oo anshax xumo ah, iyadoo loo marayo nidaamyada kombiyuutarka ama aaladaha kale ee casriga ah, ha u doono nafsadiisa ama qof kale; ama
 - e) Ku haysta nuxurka anshax-xumidda nidaam kombiyuutar ama ku keydsada aaladaha keydinta xogaha kombiyuutarka.
2. Ujeeddada Qodobkan:
 - a) Ereyga "Nuxurka anshax-xumada ah" waxaa ka mid ah sawiro ama muuqaallo muujinaya:
 - i. qof ku kacaya fal galmo oo qayaxan;
 - ii. qof ku hawlan ficil ama tilmaan uu ku soo bandhigayo cowradiisa jirka ama xubintiisa taranka; ama
 - iii. muuqaallo dhab ahaan loo qaadan karo dad ama kartoono ku hawlan ficilo galmo ah ama anshax-xumo ah.

3. Dembiyada ku cad qodobkan waxaa lagu mutaysanaa ciqaab, marka la isku helo:
 - a) Haddii shakhsi geystay, waxaa lagu xukumayaa xabsi muddo aan ka badnayn 10 (toban) sano ama ganaax lacageed oo aan ka badnayn \$50,000 (konton kun) oo Doollarka Mareykanka ah ama Shillin Soomaali u dhigma, ama labadaba; ama
 - b) Haddii ay shirkadi geysatay, waxaa lagu xukumayaa ganaax lacageed oo aan ka badnayn \$300,000 (saddex boqol kun) oo Doollarka Mareykanka ah ama Shillin Soomaali u dhigma.

**CUTUBKA SHANAAD:
MAS’UULIYADDA DEMBI-KU-KAALMEYNTA**

**Qodobka 18^{aad}:
Ku-kaalmayn, Ku-Dhiirrin ama Iskuday Gelid Dembi**

1. Qofka si ku-talo-gal ah isugu daya geysashada dembi ka mid ah kuwa ku xusan cutubyada labaad, saddexaad ama afaraad ee sharcigan, wuxuu gelayaa dembi.
2. Dembiyada ku cad faqradda (1) ee qodobkan waxaa lagu mutaysanaa ciqaab, marka la isku helo:
 - a) Haddii shakhsi geystay, waxaa lagu xukumayaa xabsi muddo aan ka badnayn 5 (shan) sano ama ganaax lacageed oo aan ka badnayn \$15,000 (shan iyo toban kun) oo Doollarka Mareykanka ah ama Shillin Soomaali u dhigma, ama labadaba; ama
 - b) Haddii ay shirkadi geysatay, waxaa lagu xukumayaa ganaax aan ka badnayn \$300,000 (saddex boqol kun) oo Doollarka Mareykanka ah ama Shillin Soomaali u dhigmata.
3. Dembiyada ku cad faqradda (2) ee qodobkan waxaa lagu mutaysanaa ciqaab, marka la isku helo:
 - a) Haddii shakhsi geystay, waxaa lagu xukumayaa xabsi muddo aan ka badnayn 3 (saddex) sano ama ganaax lacageed oo aan ka badnayn \$10,000 (toban kun) oo Doollarka Mareykanka ah ama Shillin Soomaali u dhigmana, ama labadaba; ama
 - b) Haddii ay shirkadi geysatay, waxaa lagu xukumayaa ganaax lacageed oo aan ka badnayn \$150,000 (boqol iyo konton kun) oo Doollarka Mareykanka ah ama Shillin Soomaali u dhigma.

**Qodobka 19^{aad}:
Dembiyada Shirkadaha ay Galaan**

1. Shirkadda waxaa loo qaadanayaa inay gashay dembiyada ku cad sharcigan, haddii dembiga uu galay qof dabiici ahi, si shakhsiyan ah ama isagoo matalaya waax kamid ah shirkadda, isla-markaana uu qofkaasi shirkadda ku dhex leeyahay door hoggaamineed sida:
 - a) Awood matalaadeed;
 - b) Awood go’aan gaaris; iyo
 - c) Awood fulin ama maamul.
2. Shirkadda waxaa loo tix-gelinayaa in ay gashay dembiyada ku cad sharcigan, marka dembiga dhacay sababtiisa tahay kormeer-la’aan qof dabiici ah oo leh awoodaha ku xusan faqradda (1) ee qoddobkan.
3. Haddii shirkada lagu helo dembiyada ku xusan sharcigan waxaa loo aqoonsanayaa in ay gashay dembigaas, waqtiga fal-dembiyeedku dhacay qofka shirkadda u ah

agaasime, hoggaamiye sare, maamule, xoghaye guud ama hayey xil kale oo la mid ah, ama sheegtay in uu leeyahay mas'uuliyad noocaas ah, ama si kale iyo hannaan kelaba mas'uul uga ah maamulka qeyb ka mid ah arrimaha shirkadda ama gacan uga geysanayey maamulka ayaa:

- a) Si wadajir ama gaar gaar ah ayaa loogu soo oogi karaa dacwadaas shirkadda ka dhanka ah; ama
- b) Haddii shirkadda lagu helo dembiga, waxaa loo aqoonsanayaa in shirkadda iyo qofka mas'uulka ahiba galeen dembigaas, haddii aan qofka mas'uulka ahi caddayn:
 - i. In dembiga la galay iyadoo aan qofku ogeyn ama aanu oggolaan ama raalli ka ahayn; iyo
 - ii. In qofku sameeyey dhammaan taxaddarrada iyo dadaal kasta oo lagu baajin karay dhicidda fa-dembiyeedka.

CUTUBKA LIXAAD: AWOODAHA HAB-RAACA

Qodobka 20^{aad}: Baaxadda Qodobbada Hab-raaca

1. Dhammaan awoodaha iyo hab-raacyada hoos yimaada sharcigan waxaa lagu dabaqayaa ama loo adeegsanayaa marka loo eego dhammaan:
 - a) Dembiyada ku xusan cutubyada labaad, saddexaad, afaraad iyo shanaad ee sharcigan;
 - b) Dembiyada kale ee lagu geysto nidaam kombiyuutar ama aaladaha kale ee casriga ah kuna cad sharci kale; iyo
 - c) Isugeynta caddeymaha danabeysan ee khuseeya dembiyada ku cad sharcigan ama sharci kaleba.
2. Awoodaha iyo hab-raacyada lagu xusay sharcigan ma ahan kuwo ka hor-imaanaya ama wax u dhimaya awoodaha Xeerka Habka Cigaabta ama sharci kasta oo kale oo khuseeya iyo xeerar kasta oo hoos yimaad.

Qodobka 21^{aad}: Dhawrista Sharciga

Dhammaan awoodaha iyo hab-raacyada ku cad sharcigan waxay waafaqsan yihiin Dastuurka Federaalka, shuruucda dalka iyo heshiisyada caalamiga ah ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya ay qeybta ka tahay.

Qodobka 22^{aad}: Ilaalinta Xogta Kombiyuutarka ee Keydsan

1. Haddii sarkaal idmani, isagoo ka duulaya sababo macquul ah ku qanco in xog gaar ah oo ku keydsan kombiyuutar ama aalad kale ay muhiim u tahay dembi-baaris ama dacwad-dembiyeed, sarkaalka idmani waa in uu siiyo ogeysiis qoraal ah uu ku farayo qofka gacanta ku haya kombiyuutarka ama aalada xogtu ku keydsantahay "haynta, ilaalinta iyo hubinta bedqabka" xogta la xusay muddo ilaa 90 (sagaashan) maalmood ah.
2. Iyadoo la tix-gelinayo muhiimadda faqradda (1) ee qoddobkan, tix-gelin gaar ah ayaa la siinayaa haddii ay jiraan sababo loo qaateen ah oo muujinaya in xogta kombiyuutarka ama aalada ku keydsani tahay mid si gaara ah ugu nugul lumid ama wax-ka-beddelid.

3. Sarkaalka idmani maxkamad ayuu halmar ama ka badan ka codsan karaa kordhinta waqtiga lagu cayimay ogeysiiska qoraalka ah ee ku xusan faqradda (1) ee qoddobkan.
4. Qofka la siiyey ogeysiiska qoraalka ah sida ku cad faqradda (1) ee qodobkan, waa in uu ilaaliyaa sirta hab-raaca iyo xog kasta oo la xiriirta ogeysiiska muddada ogeysiisku dhaqan-galka yahay, oo ay ka mid tahay muddo kordhin kasta oo la sameeyo, sida ku cad faqradda (3) ee qoddobkan.
5. Qofka ku guul-darreysta, cudurdaar-la'aan, in uu u hoggaansamo ogeysiiska qoraalka ah ee ku xusan faqradda (1) ama shuruudaha faqradda (4) ee qodobkan wuxuu gelayaa dembi, waxaana lagu xukumayaa xabsi muddo aan ka badnayn 5 (shan) sano ama ganaax lacageed oo aan ka badnayn \$10,000 (toban kun) oo Doollarka Mareykanka ah ama Shillin Soomaali u dhigma, ama labadaba.

Qodobka 23^{aad}:

Dhawrista iyo Shaacinta Qulqulka Xogta

1. Haddii sarkaal idmani ka dib sababo macquul ah oo jira awgeed ku qanco in qulqulka xog la cayimay ay tahay in loo dhawro si waafaqsan qodobka 19^{aad} ee sharcigan, xogtaasina muhiim u tahay dembi-baaris ama dacwad oogis, sarkaalka idmani wuxuu hab qoraal ah u ogeysiinayaa qofka gacanta ku haya xogta kombiyuutar ee la cayimay in:
 - a) Qulqulka xogta la xafiday la heli karo iyadoo aan loo eegin in ay mid ama kabadan yihiin adeeg-bixiyeyaasha qeybta ka ahaa gudbinta isgaarsiintaas; iyo
 - b) In sarkaalka idmani u gudbiyo Wasaaradda Cadaaladda iyo Arrimaha Dastuurka, Xukuumadda JFS macluumaad la xiriira qulqulka xogta la cayimay oo xaddi ahaan ku filan in Wasaaradda Cadaaladda iyo Arrimaha Dastuurta, Xukuumadda JFS aqoonsato adeeg-bixiyeyaasha iyo dariiqa isgaarsiintaasi martay.
2. Qofka ku guul-darreysta, cudurdaar-la'aan, in uu u hoggaansamo ogeysiiska qoraalka ah ee ku xusan faqradda (1) ee qoddobkan wuxuu gelayaa dembi, waxaana lagu xukumayaa xabsi muddo aan ka badnayn 5 (shan) sano ama ganaax lacageed oo aan ka badnayn \$10,000 (toban kun) oo Doollarka Mareykanka ah ama Shillin Soomaali u dhigma, ama labadaba.

Qodobka 24^{aad}:

Soo-saaridda Amarrada

1. Markuu sarkaal idman maxkamad usoo gudbiyo codsi maan-gal ah oo qeexaya in xog kombiyuutar ama xog macmiil oo gaar ah, muhiim u tahay baaris dembi ama dacwad oogis, maxkamaddu waxay amri kartaa:
 - a) Qof ku sugan gudaha JFS, in uu soo gudbiyo xogta kombiyuutar ee gaarka ah ee qofkaasi hayo, kuna keydsan nidaam kombiyuutar ama keyd xogeedka kombiyuutar; iyo
 - b) In adeeg-bixiye ka hawl-gala gudaha soo gudbiyo xogta adeeg-bixiyuhu ka hayo macmiilka la cayimay.
2. Ka hor inta aan maxkamaddu bixin amarka ku cad qodobkan, maxkamaddu waxay tixgelisaa arrimaha soo socda:
 - a) Halista ama khatar ahaanshaha dembiga ama dacwad-oogistu la xiriirto;
 - b) Isku halaynta ama inta la aamini karo sugnaanshaha macluumaadka lasoo gudbiyey, oo ay ka mid tahay culayska iyo isha macluumaadku ka yimid;

- c) In maslaxadda guud ee laga leeyahay xogta kombiyuutar ama xogta macmiilku tahay mid ka culus natiijada ka dhalan karta ku xad gudubka xuquuqda gaarka ah ee qofka ay saamaynayso;
 - d) In ay jirto xiriir maan-gal ah oo ka dhexeeya caddeymaha la dabasocdo iyo dembiga baaristu ama dacwad-oogistu la xiriirto;
 - e) In wax shuruud ah la raacin karo amarka maxkamadda; iyo
 - f) Wixii kale ee ay maxkamaddu u aragto inay muhiim u yihiin dembi baarista ama dacwad-oogista.
3. Qofka ku guul-darreysta, cudurdaar maan-gal ah la'aantiis, in uu u hoggaansamo ogeysiiska qoraarka ah ee ku xusan faqradda 1aad ee qodobkan wuxuu gelayaa dembi waxaana lagu xukumayaa ganaax aan ka badnayn 10, 000 (Toban kun) oo Doollarka Mareykanka ah ama lacag shillin Soomaali ah oo u dhiganta ama xabsi muddo aan ka badnayn 5 (shan) sano, ama labadaba.

Qodobka 25^{aad}:

Baaritaan iyo La-wareegid

1. Astaamaha ku xusan Qodobka 24^{aad} ee Xeerka Habka Cigaabta Soomaaliyeed, Cutubka II madixiisa 1aad ayaa lagu dabaqayaa baaritaan iyo la-wareegid kasta oo la xiriirta dembiyada ku xusan Cutubyada Labaad, Saddexaad, Afaraad iyo Shanaad ee Sharcigan.
2. Ujeeddooyinka Qodobka 24^{aad} ee Xeerka Habka Cigaabta Soomaaliyeed, iyo Cutubka II, madixiisa 1aad ee Xeerkaas ayaa loo raacayaa baaris kasta oo la xiriirta dembi sida ku cad Cutubyada Labaad, Saddexaad, Afaraad iyo Shanaad ee sharcigan, waana in lagu daro baaritaan ama hab la mid ah oo sahlaya in la furo ama la galo:
 - a) Nidaam kombiyuutar ama qeyb ka mid ah nidaamkaas ama xogta kombiyuutar ee ku jirta; iyo
 - b) Nidaamka keydka xogaha kombiyuutarka ee laga yaabo in xogta lagu keydiyey.
3. Ujeeddooyinka qodobka 24^{aad} ee Hab-raaca Xeerka Cigaabta iyo cutubka III, madixiisa laad ee Hab-raaca Xeerka Cigaabta, la-wareegid kasta oo la xiriirta dembiyada ku cad Cutubyada Labaad, Saddexaad, Afaraad iyo Shanaad ee sharcigan waa in lagu daro awoodda:
 - a) La-wareegid ama si la mid ah oo lagu hubin karo sugidda nidaam kombiyuutar ama qeyb ka mid ah nidaamkaas ama keydka xogta kombiyuutarka;
 - b) Sameynta nuqul ka mid ah xogta kombiyuutarka iyo haynta nuqulkaas; iyo
 - c) Dhawrista bedqabka xogaha la xiriira baarista ama dacwad-oogista ee ku jira keydka kombiyuutarka; iyo
 - d) In laga dhigo mid aan la geli karin ama xogtaas laga tirtiro nidaamkii kombiyuutar ee laga soo saaray.
4. Qofka sameynaya baaritaanka qodobkan ku xusan, waxaa u banaan in uu:
 - a) Xilli kasta baari karo, geli karo, isla markaana kor-meer ama hubin ku samayn karo shaqada nidaam kasta oo kombiyuutar, Ablikayshin ama aaladaha xogaha lagu keydiyo, haddii qofku isagoo ka duulaya sababo maan-gal ah aaminsanyahay in tillaabadaasi lagama-maarmaan u tahay fududaynta baaritaanka la idmay;
 - b) Ka dalban karo qofka mas'uulka ka ah ama si kaleba ugu lug leh, gacan-ku-haynta ama daryeelka nidaamka kombiyuutar, ablikayshin ama

- aaladaha xogtu ku keydsantahay, caawimaadda ugu suuragalsan ee looga baahan karo fududaynta baaritaanka la idmay; iyo
- c) Ku amri karo adeeg-bixiyaha, iyadoo la eegayo awooddiisa farsamo:
- i. Ururinta ama duubidda xogta iyadoo la adeegsanayo ablikayshin awood u leh; ama
 - ii. la shaqeeyo ama ka caawiyo mas'uuliyiinta awoodda u leh qabashada ama keydinta qulqulka xogta la xiriirta isgaarsiinta la cayimay ee la isugu gudbiyey nidaam kombiyuutar.
5. Nidaam kombiyuutar ama qeyb ka mid ah ama nidaamka keydka xogaha kombiyuutarka ee loola wareego si waafaqsan qodobkan waa in lagu soo celiyo toddobaatan iyo labo (72) saacadood gudahood haddii aan la helin amar maxkamad awood leh oo samaysa muddo kordhin.
6. Qofka horjoogsada, hor istaaga ama u hanjaba qof gudanaya waajibaadkiisa ama gudashada awoodiisa ku xusan qodobkan, wuxuu gelayaa dembi, waxaana lagu xukumayaa ganaax aan ka badnayn 5,000, (Shan kun) oo Doollarka Mareykanka ah ama lacag shillin Soomaali ah oo u dhiganta ama xabsi muddo aan ka badnayn 3 (saddex) sano, ama labadaba.

Qodobka 26^{aad}:

Qabashada Qulqulka Xogta ee Waqtiga Dhabta ah (Real-time Collection of Traffic Data)

1. Marka sarkaal idmani soo gudbiyo codsi sheegaya in qulqulka xog cayiman oo la xiriirta isgaarsiin cayiman oo la isugu gudbiyey nidaam kombiyuutar, si maan-gal ah loogu baahanyahay in la qabto waqtiga dhabta ah ee qulqulka xogtu socoto, iyadoo ujeeddadu tahay baaris dembi ama dacwad-oogis ama sababaha ku cad qodobka 35^{aad} ee sharcigan, maxkamaddu waxay:
 - a) Amri kartaa qabashada ama keydinta waqtiga dhabta ah ee qulqulka xogta, iyadoo la adeegsanayo dabaqid awood u leh; ama
 - b) Adeeg-bixiyaha amri kartaa:
 - i. Qabashada ama keydinta waqtiga dhabta ah ee qulqulka xogta iyadoo la adeegsanayo ablikayshin awood u leh; ama
 - ii. In uu kala shaqeeyo isla markaana ka caawiyo laamaha sharci fulinta qabashada iyo keydinta waqtiga dhabta ah ee qulqulka xogtaas.
2. Marka la samaynayo codsiga ku xusan faqradda (1) ee qodobkan sarkaalka idmani waa in uu:
 - a) Caddeeyo sababta uu u aaminsanyahay in qulqulka xogta lagu daba-jiro tahay mid uu heli karo qofka haya nidaamka kombiyuutar ee la cayimay;
 - b) Magacaabo, faahfaahinna ka bixiyo nooca qulqulka xogeed ee la tuhunsanyahay in ay ku jirto nidaamkaas kombiyuutar ee la cayimay;
 - c) Magacaabo, faahfaahina ka bixiyo dembiyada la xiriira ee amarku daba socdo; iyo
 - d) Faahfaahin ka bixiyo tallaabooyinka ku habboon in la qaado si loo bilaabo loona hubiyo raadinta qulqulka xogta, iyadoo:
 - i. La ilaalinayo khusuusiyaadka u gaarka ah macaamiisha iyo isticmaalayaasha kale, iyo
 - ii. In aan xogta la la wadaagin cid aan qeyb ka ahayn baaritaanka.
3. Maxkamaddu ka hor inta aanay bixin amarka ku xusan qodobkan, waxay tixgelisaa arrimaha soo socda:
 - a) Halista dembiga lala xiriirinayo dembi baarista ama dacwad-oogista;

- b) Kalsoonida lagu qabi karo macluumaadka codsiga ku salaysan yahay, oo ay ku jiraan nooca iyo isha laga helay macluumaadka;
 - c) In danta iyo maslaxadda guud ee laga leeyahay, qabashada ama keydinta Waqtiga qulqulka xogtu ka culustahay saamaynta taban ee soo-saarista natiijadu ku yeelan karto khusuusiyaadka iyo xuquuqaha gaarka ah ee qofka ay saamaynayso;
 - d) In ay jirto xiriir maan-gal ah oo ka dhexeeya caddeymaha la dabasocdo iyo baarista dembiga ama dacwad-oogista;
 - e) In wax shuruud ah la raacin karo amarka maxkamadda; iyo
 - f) Wixii kale ee ay maxkamaddu u aragto inay muhiim u yihiin dembi baarista ama dacwad-oogista.
4. Adeeg-bixiyaha lagu soo saaray amarka ku xusan qodobkan waa in uu ilaaliyaa sirta hab-raac kasta iyo macluumaad kasta oo la xiriira amarka, muddada amarka maxkamaddu dhaqan-galka yahay.
 5. Qofka ku guul-darreysta cudurdaar maan-gal ah la'aantiis, in uu u hoggaansamo amarada ku cad qodobkan ama shuruudaha faqradda (4) ee qodobkan, wuxuu gelayaa dembi waxaana lagu xukumayaa ganaax aan ka badnayn 5,000 (Shan kun) oo Doollarka Mareykanka ah ama lacag shillin Soomaali ah oo u dhiganta ama xabsi muddo aan ka badnayn 3 (saddex) sano ama labadaba.

Qodobka 27^{aad}: Dhex-galka Xogta Isgaarsiinta

1. Marka sarkaal idmani soo gudbiyo codsi sheegaya in qulqulka xog cayiman oo la xiriirta isgaarsiin cayiman oo la isugu gudbiyey nidaam kombiyuutar, si maan-gal ah loogu baahanyahay in la qabto waqtiga dhabta ah ee ay xogtu socotay, iyadoo ujeeddadu tahay baaris dembi ama dacwad-oogis ama sababaha ku cad qodobka 33-aad ee sharcigan, maxkamaddu waxay:
 - a. Amri kartaa qabashada ama duubida waqtiga dhabta ah ee xogtu socoto, iyadoo la adeegsanayo ablikayshin awood u leh; ama
 - b. Amri kartaa adeeg-bixiyaha:
 - i. Qabashada, keydinta ama duubista waqtiga dhabta ah ee xogto socoto, iyadoo la adeegsanayo ablikayshin awood u leh; ama
 - ii. In uu kala shaqeeyo isla markaana ka caawiyo laamaha sharci fulinta qabashada, keydinta iyo duubista waqtiga dhabta ah ee xogtu socoto.
2. Marka la samaynayo codsiga ku xusan faqradda (1) ee qodobkan sarkaalka idmani waa in uu:
 - a. Caddeeyo sababta uu u aaminsan yahay in xogta lagu daba-jiro tahay mid uu heli karo qofka gacanta ku haya nidaamka kombiyuutar ee la cayimay;
 - b. Magacaabo, faahfaahina ka bixiyo nooca xogta la tuhunsanyahay in ay ku jirto nidaamka kombiyuutar ee lacayimay;
 - c. Magacaabo, faahfaahina ka bixiyo dembiyada la xiriira ee amarku daba socdo; iyo
 - d. Faahfaahin ka bixiyo tallaabooyinka ku habboon in la qaado si loo bilaabo loona hubiyo raadinta qulqulka xogta, iyadoo:
 - i. La ilaalinayo khusuusiyaadka u gaarka ah macaamiisha isticmaalayaasha kale; iyo
 - ii. In aan *xogta lala wadaagin cid aan qeyb ka ahayn baaritaanka*.
3. Maxkamaddu ka hor inta aanay bixin amarka qodobkan, waxay tixgelisaa arrimaha soo socda:

- a. Halista dembiga lala xiriirinayo dembi baarista ama dacwad-oogista;
 - b. Kalsoonida lagu qabi karo macluumaadka codsiga ku salaysan yahay, oo ay ku jiraan nooca iyo isha laga helay macluumaadka;
 - c. In danta iyo maslaxadda guud ee laga leeyahay qabashada, duubida iyo keydinta waqtiga dhabta ah ee xogtu socoto, ka culustahay saamaynta taban ee soo-saarista natiijada ku yeelan karto khusuusiyaadka iyo xuquuqaha gaarka ah ee qofka ay saamaynayso;
 - d. In ay jirto xiriir maan-gal ah oo ka dhexeeya caddeymaha la dabasocdo iyo baarista dembiga ama dacwad-oogista;
 - e. In wax shuruud ah la raacin karo amarka maxkamadda; iyo
 - f. Wixii kale ee ay maxkamaddu u aragto inay muhiim u yihiin dembi baarista ama dacwad-oogista.
4. Adeeg-bixiyaha lagu soo saaray amarka ku xusan qodobkan waa in uu ilaaliyaa sirta hab-raac kasta iyo macluumaad kasta oo la xiriira amarka, muddada amarka maxkamaddu dhaqan-galka yahay.
 5. Qofka ku guul-darreysta, cudurdaar maan-gal ah la'aantiis, in uu u hoggaansamo amarada ku cad qodobkan ama shuruudaha faqradda (4) ee qodobkan, wuxuu gelayaa dembi waxaana lagu xukumayaa ganaax aan ka badnayn 5,000 (Shan kun) oo Doollarka Mareykanka ah ama lacag shillin Soomaali ah oo u dhiganta ama xabsi muddo aan ka badnayn 3 (saddex) sano ama labadaba.

CUTUBKA TODDOBAAD: ISKAASHIGA GARSOORKA CAALAMIGA AH

Qodobka 28^{aad}: Is-gargaarsiga Sharciyeed iyo Dhiibidda Dembiileyaasha (MLA and Extradition of Criminal Offenders)

1. Cutubkan waxaa la dabaqayaa marka loo eego hab-raacyada ku xusan Buugga Shanaad ee Xeerka Habka Ciqaabta Soomaaliyeed ee khuseeya Dhiibidda Dembiileyaasha iyo sharci kasta oo la xiriira oo dhaqan-gal ka noqda dalka ama Axdi caalami ah oo JFS qeybta ka tahay.
2. Xeer Ilaalinta Guud ayaa leh awoodda mas'uuliyadda dalbashada iyo ka-jawaabista codsiyada la xiriira is-gargaarsiga sharciyeed, dhiibidda dembiileyaasha, tuhmanayaasha, fulinta codsiyada arrimahaas la xiriira iyo u-gacan-gelinta hay'adaha ku shaqada leh isagoo kaashanaya Wasaaradda Caddaaladda iyo Wasaaradda Arrimah Dibedda.
3. Xeer Ilaalinta Guud ayaa Qaran kasta ka dalban karta gargaar sharci oo la xiriirta xaalad kasta oo dembi iyadoo ujeeddadu tahay:
 - a. Dembi-baaris ama dacwad-oogis la xiriirta dembiyo lagu geystay nidaamyo kombiyuutar, isgaarsiimo ama xogo;
 - b. Ururinta caddeymo dembi oo danabeysan; ama
 - c. Helidda caawimaad sharci oo dheeri ah oo waafaqsan qodobada cutubkan.
4. Marka codsi waafaqsan shuruudaha cutubkan laga helo Qaran codsade ah, ayaa Xeer Ilaalinta Guud oo ku salaynaysa qodobbada sharci kasta oo khuseeya ama Axdi caalami ah, waxay:
 - a. Aqbali kartaa gargaarka sharci ee la codsaday; ama
 - b. Diidi kartaa bixinta gargaarka sharci ee la codsaday.
5. Iyadoo aan lagu salayn wax kale ama aan daliil looga dhigin diidmada ku xusan cutubkan ama sharci kale oo la xiriira ama axdi caalami ah, ayaa Xeer Ilaalinta

Guud diidi kartaa codsi waafaqsan shuruudaha Cutubkan oo laga helay Qaran codsade ah, haddii:

- a. Codsigu khuseeyo dembi ay u aragto dembi siyaasadeed ama dembi la xiriira ra'yi siyaasadeed; ama
 - b. Xeer Ilaalinta Guud u aragto in fulinta codsigaasi wax u dhimi karto madax-bannaanida, amniga, kala-dambaynta guud ama danaha kale ee muhiimka ah Qaranka JFS.
6. Xeer Ilaalinta Guud waxay dib u dhigi kartaa fulinta codsi Qaran soo dalbaday si waafaqsan shuruudaha cutubkan, haddii Xeer Ilaalinta Guud u aragto in fulinta codsigu wax u dhimmi karto dembi-baaris ama dacwad-oogis ay ku hawllan yihiin hay'adaha ay khusayso.
 7. Ka hor inta aan la diidin ama aan dib loo dhigin gargaarka sharci, Xeer Ilaalinta Guud oo marka ay ku habboon tahay la tashanaysaa Qaranka codsadaha ah, waxay oggolaan kartaa qeyb ahaan gargaarka codsiga ama waxay ku xiri kartaa shuruud dheeri ah, hadba sida lagama-maarmaanka ah.
 8. Xeer Ilaalinta Guud waxay sida ugu dhaqsaha badan ugu wargelinaysaa Qaranka codsadaha ah natiijada fulinta codsiga gargaarka sharci, sida sababaha diidmada ama dib-u-dhigista codsiga ama sabab kasta oo fulinta codsiga ka dhigaysa mid aan suurta-gal ahayn ama daahinaysa muddo dheer.

Qodobka 29^{aad}:

Xog aan Gudbinteeda Hore loo Qorsheyn

Xeer Ilaalinta Guud, iyadoo raacaysa sharcigan iyo sharci kasta oo la xiriira, waxay Qaran aan codsan kaalmo sharci u gudbin kartaa xog lagu helay nidaamyada baaritaan ee sharciga ah, marka Xeer-ilaalinta Guud uu aragto in daah-ka-qaadida macluumaadkaas ay Qarankaas ka caawin karto bilaabidda ama fulinta baaris dembi ama dacwad-oogis, ama ay Qarankaas u horseedi karto dalbashada kaalmo sharci oo waafaqsan cutubkan.

Qodobka 30^{aad}:

Ilaalinta Sirta iyo Xaddididda Adeegsigeeda

1. Marka JFS ay tahay Qaranka codsiga samaynaya si waafaqsan qodobka 28aad ee sharcigan, Xeer Ilaalinta Guud waxay ka dalban kartaa Qaranka gargaarka codsiga la waydiisanayo ilaalinta macluumaadka codsiga iyo cidda codsigu khuseeyo, marka laga reebo inta muhiimka u ah fulinta codsiga.
2. Marka JFS laga codsado kaalmo sharci si waafaqsan Cutubkan, ayaa Xeer Ilaalinta Guud oo tix-gelinaysa bixinta macluumaadka si waafaqsan Qodobka 26aad ee sharcigan, waxay bixinta xogta ama agabka codsigu ku saabsan yahay shuruud uga dhigi kartaa in:
 - a. Ay qarsoodi ahaato;
 - b. Aan loo isticmaalin dembi baaris ama dacwad-oogis ama ujeeddo kale oo aan ka ahayn mida ku xusan codsiga, iyadoo aan oggolaansho qoran laga helin Xeer Ilaalinta Guud ee Soomaaliya;
 - c. Dokumeenti kasta ama nidaam kasta oo xog ku jirto la bur-burindoono marka laga gaaro ujeeddada codsiga; ama
 - d. In Qaranka codsiga soo gudbiyey fuliyo haddii ay jiraan shuruud dheeri ah oo Xeer Ilaalinta Guud go'aamisay una gudbisay hab qoraal ah.
3. Qaran kasta oo Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya ka codsada macluumaad ama agab kale, isla markaana aan fulin karin shuruudaha ku xusan qodobkan

faqraddiisa (2), Xeer Ilaalinta Guud waxay dalban kartaa in sida ugu dhaqsaha badan uguna suurta-galsan uu Qarankaasu ugu soo wargaliyo in aanu fulin Karin shuruudaha la cayimay.

4. Ka dib marka la helo wargelinta ku cad faqradda (3) ee qodobkan, Xeer Ilaalinta Guud waxay go'aaminaysaa bixinta ama diidmada macluumaadka lasoo codsaday.

Qodobka 31^{aad}:

Dhaqso-u-xafididda Xog Kombiyuutar ee Qaran Codsado

1. Qaranka uu nagala dhexeeyo heshiis is-gargaarsi sharciyeed si waafaqsan Qodobka 28^{aad} ee sharcigan, ayaa Xeer Ilaalinta Guud ka codsan karaa in ay amrto degdeg-u-qabashada ama keydinta xog ku jirta nidaam kombiyuutar oo yaal geyiga JFS, dalabkan waxaa la sameynayaa marka Qaranka codsadhaha ahi qorsheynayo in uu u soo gudbin doono Xeer Ilaalinta Guud ee JFS codsi is-gargaarsi sharci oo waafaqsan shuruudaha sharcigan.
2. Codsiga ku xusan qodobkan waa in uu ahaadaa qoraal oo ay ku jiraan tilmaamaha soo socda:
 - a. Magaca hay'adda soo jeedinaysa codsiga ee Qaranka codsadhaha ah;
 - b. Fal-dembiyeedka baarista ama dacwadu ay khusayso iyo warbixin kooban oo ku saabsan xaqiiqooyinka la xiriira;
 - c. Magaca hay'adda sharci fulinta ee Qaranka fal-dembiyeedku khuseeyo;
 - d. Macluumaad ku saabsan xogta kombiyuutar ee ay tahay in la keydiyo iyo xiriirka ka dhexeeya xogta iyo fal-dembiyeedka;
 - e. Macluumaad kasta oo la heli karo oo tilmaamaya cidda haysa xogta kombiyuutar ama goobta nidaamka kombiyuutar yaal;
 - f. Sababaha codsiga iyo faahfaahin ku saabsan muhiimada baahida in la sugo xogta; iyo
 - g. Caddeymo muujinaya in Qarankaasu qorsheynayo soo-gudbinta codsi rasmi ah oo iskaashi sharci lana xiriira raadinta, qabashada ama si la mid ah sugidda, ama shaacinta xogta lagu xafidayo codsiga Qaranka shisheeye (foreign preservation order).
3. Xeer Ilaalinta Guud oo tixgelinaysa ka jawaabidda codsiga, haddii ay la noqoto in sugidda xogtu aanay dammaanad-qaadayn helidda xogta ee mustaqbalka ama khatar gelinayso sir ahaanta xogta ama ay wax u dhimayso baaritaanka Qaranka codsadhaha ah, Xeer Ilaalinta Guud waxay si degdeg ah u wargelinaysaa Qarankaas, oo markaas ka dib go'aamin doona in codsiga sidaas lagu fuliyo iyo in kale.
4. Xeer Ilaalinta Guud waxay uga jawaabaysaa codsiga si waafaqsan sharcigan iyo sharci kasta oo kale oo khuseeya ama heshiisyada caalamiga ah, codsiga haddii la aqbalo, Xeer Ilaalinta Guud waxay si degdeg ah u soo saaraysaa ogeysiis faraya cidda xogta haysa xafididda iyo bedqabka xogta muddo 90 (sagaashan) maalmood ah.
5. Qofka uu khuseeyo ogeysiiska ku cad qodobkan waa in uu ilaaliyaa sirta iyo macluumaad kasta oo la xiriira ogeysiiska muddada uu dhaqan-galka yahay.
6. Qofka ku guul-darreysta, cudurdaar maan-gal ah la'aantiis u hoggaansamida ogeysiiska qoraalka ah ee ku xusan qodobkan ama shuruudaha faqradda 5aad ee qodobkan wuxuu gelayaa dembi, waxaana lagu xukumayaa xabsi muddo aan ka badnayn 3 (saddex) sano ama ganaax lacageed oo aan ka badnayn \$5,000 (shan kun) oo Doollarka Mareykanka ah ama Shillin Soomaali u dhigma, ama labadaba.

Qodobka 32^{aad}:
Degdeg-u-bixinta Qulqul Xogeed oo La Keydiyey

Haddii Xeer Ilaalinta Guud ee JFS oo ku gudo-jirta fulinta codsi sharci ah oo waafaqsan Qodobka 28^{aad} ee sharcigan lana xiriirta xogta isgaarsiin cayiman, ay ogaato in adeeg-bixiye Qaran kale jooga ku lug leeyahay gudbinta isgaarsiintaas, Xeer Ilaalinta Guud waxay si degdeg ah ugu gudbinaysaa Qaranka codsadaha ah macluumaad ku filan qulqulka xogtaas si loo aqoonsado adeeg-bixiyaha iyo habka la isugu gudbiyey isgaarsiintaas.

Qodobka 33^{aad}:
Iskaashi La Xiriira Gelidda Xog Kombiyuutar oo Keydsan

1. Qaran uu nagala dhexeeyo heshiis is-gargaarsi sharciyeed si waafaqsan Qodobka 28^{aad} ee Sharcigan ayaa Xeer Ilaalinta Guud ka codsan kara in uu baaro, ama la wareego, sugo ama shaaciyo xog ku keydsan nidaam kombiyuutar oo yaal geyiga JFS oo ay ku jirto xog loo keydiyey.
2. Codsiga ku xusan qodobkan waa in uu ahaadaa qoraal, ayna ku jiraan arrimaha soo socda:
 - a. Magaca hay'adda soo jeedinaysa codsiga ee Qaranka codsadaha ah;
 - b. Fal-dembiyeedka baarista ama dacwadu ay khusayso iyo warbixin kooban oo ku saabsan xaqiiqooyinka la xiriira;
 - c. Magaca hay'adda sharci fulinta ee Qaranka fal-dembiyeedku khuseeyo;
 - d. Faahfaahin la xiriirta hab kasta oo uu Qaranka codsadaha ahi doonayo in la raaco marka la fulinayo codsiga;
 - e. Macluumaad kasta oo la heli karo oo tilmaamaya cidda haysa xogta kombiyuutar ama goobta nidaamka kombiyuutar yaalo;
 - f. Heshiis la xiriira bixinta Qaanta/mag-dhawga ama kharashaadka ka dhasha fulinta *codsiga*.
3. Xeer Ilaalinta Guud waxay uga jawaabaysaa codsiga si waafaqsan sharcigan iyo sharci kasta oo kale oo khuseeya ama heshiis caalami ah. Xeer Ilaalinta Guud haddii ay aqbasho fulinta codsiga waxay qaadaysaa dhammaan tallaabooyinka ku habboon si loo helo oggolaansho kasta oo lagama-maarmaan u ah fulinta codsiga, oo ay ku jirto helitaanka amar-bixin (warrant) kasta oo muhiim u ah fulinta.
4. Codsiga waa in looga jawaabo si degdeg ah marka ay jiraan sababo muujinaya in xogtu u nugushahay in ay lunto ama wax laga beddelo ama haddii sharci kale ama heshiis caalami ahi uu sidaas farayo.

Qodobka 34^{aad}:
Gelidda Xog Caam Ah Ama Oggolaansho Ku Gelidda Xog Kombiyuutar Ku Keydsan

Qaran aan oggolaansho ka haysan Xeer Ilaalinta Guud ama hay'ad kale oo katirsan Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, ayaa:

- a) Geli karaa xog caam ah oo kumbuyuutar ku kaysan, iyadoo aan loo eegin halka juqraafi ahaan xogtu taalo; ama
- b) Geli karaa ama heli karaa xog ku kaydsan kumbuyuutar yaala gudaha JFS, iyadoo loo marayo nidaam kombuyuutar oo yaala qarankaas, hadii

waddankaasu ogolaansho sharci ah oo ikhtiyaari ah ka helo qofka awoodda sharci u leh bixinta xogtaas.

Qodobka 35^{aad}:

Iskaashiga Ururinta Waqtiga Dhabta ah ee Qulqulka Xogta

1. Qaran ayaa Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya ka codsan kara ururinta waqtiga dhabta ah ee qulqulka xog la xiriirta isgaarsiin cayiman oo la isugu gudbiyey nidaam kombiyuutar oo yaala geyiga JFS.
2. Codsiga ku xusan qodobkan waa in uu ahaadaa qoraal, ayna ku jiraan arrimaha soo socda:
 - a. Magaca hay'adda soo jeedinaysa codsiga ee Qaranka codsadaha ah;
 - b. Fal-dembiyeedka baarista ama dacwadu ay khusayso iyo warbixin kooban oo ku saabsan xaqiiqooyinka la xiriira;
 - c. Magaca hay'adda sharci fulinta ee Qaranka fal-dembiyeedku khuseeyo;
 - d. Goobta ay dhici karto in lagu hayo qulqulka xogta;
 - e. Ujeeddada laga lahaa qulqulka xogta;
 - f. Macluumaad ku filan si loo aqoonsado qulqulka xogta;
 - g. Baahida loo qabo isticmaalka awoodaha hoos yimaada qodobkan; iyo
 - h. Shuruudaha adeegasiga iyo u gudbinta qulqulka xogta ee dhinac saddexaad.
3. Iyadoo la raacayo hab-raacyada hoos yimaad sharcigan iyo sharci kale oo la xiriira ama heshiis caalami ah oo faraya aqbalidda codsiga, Xeer Ilaalinta Guud waxay bixinaysaa gargaarka codsiga ee khusaysa dembiga la xiriira ururinta waqtiga dhabta ah ee qulqulka xogta, iyadoo loo marayo si la mid ah hab-raaca baarista dembiyada gudaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, oo ay ku jiraan helitaanka amar maxkamadeed sida ku cad qodobka 26aad ee sharcigan.
4. Marka Xeer Ilaalinta Guud go'aan ka gaarayso codsi waafaqsan qodobkan, waxay tixgelinaysaa in:
 - a. Ururinta waqtiga dhabta ah ee qulqulka xogtu lagama-maarmaan u tahay baaritaan dembi culus oo ka dhan ah sharciga Qaranka codsadaha ah; iyo
 - b. Danta guud ee laga leeyahay gudbinta qulqulka xogtu ay aad uga miisaan culus tahay xuquuqaha gaarka ah ee qofka ay saameyn karto natiijada gudbinta xogtu.

Qodobka 36^{aad}:

Iskaashiga Ururinta Waqtiga Dhabta ah ee Nuxurka Xogta

1. Qaran ayaa JFS ka codsan kara ururinta ama duubista waqtiga dhabta ah ee nuxurka xog la xiriirta isgaarsiin cayiman oo la isugu gudbiyey nidaam kombiyuutar oo yaala geyiga JFS.
2. Codsiga ku xusan qodobkan waa in uu ahaadaa qoraal, ayna ku jiraan arrimaha soo socda:
 - a. Magaca hay'adda soo jeedinaysa codsiga ee Qaranka codsadaha ah;
 - b. Fal-dembiyeedka baarista ama dacwadu ay khusayso iyo warbixin kooban oo ku saabsan xaqiiqooyinka la xiriira;
 - c. Magaca hay'adda sharci fulinta ee Qaranka fal-dembiyeedku khuseeyo;
 - d. Goobta ay dhici karto in lagu hayo nuxurka xogta;
 - e. Ujeeddada laga lahaa isgaarsiintaas;
 - f. Macluumaad ku filan oo lagu aqoonsan karo isgaarsiintaas;
 - g. Loo diraha ama qofka loogu talo-galay in uu helo isgaarsiintaas;

- h. Baahida loo qabo isticmaalka awoodaha hoos yimaada qodobkan; iyo
 - i. Shuruudaha adeegasiga iyo u gudbinta nuxurka xogta ee dhinac saddexaad.
3. Iyadoo la raacayo hab-raacyada hoos yimaada sharcigan iyo sharci kale oo la xiriira ama heshiis caalami ah oo faraya aqbalida codsiga, Xeer Ilaalinta Guud waxay bixinaysaa gargaarka codsiga khuseeysa dembiga la xiriira ururinta Waqtiga dhabta ah ee nuxurka xogta, iyadoo loo marayo si la mid ah hab-raaca baarista dembiyada gudaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, oo ay ku jiraan helitaanka amar maxkamadeed sida ku cad Qodobka 27^{aad} ee sharcigan.
4. Marka Xeer Ilaalinta Guud go'aan ka gaarayso codsi waafaqsan qodobkan, waxay tixgelinaysaa in:
- a. U-gudbinta nuxurka xogtu lagama-maarmaan u tahay baaritaan dembi culus oo ka dhan ah sharciga Qaranka codsadaha ah; iyo
 - b. Danta guud ee laga leeyahay gudbinta nuxurka xogtu ay aad uga miisaan culus tahay xuquuqaha gaarka ah ee qofka ay saameyn karto natiijada gudbinta xogtu.

CUTUBKA SIDEEDAAD: QODOBO QUBANE AH

Qodobka 37^{aad}: Awoodda Soo-Saarista Xeer-nidaamiyeyaal

1. Wasiirka ayaa awood u leh soo-saarista xeer-nidaamiyeyaal ku soo baxa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda oo faahfaahinaya qodobbada sharcigan.
2. Iyadoo aan waxba loo dhimayn macnaha guud ee qodobkan faqradiisa (1) xeer-nidaamiyeyaaashu waxay tilmaami karaan:
 - a. Arrin kasta oo ku xusan sharcigan ee loo baahan karo in lagu qeexo xeer-nidaamiye; ama
 - b. Arrin kasta oo uu Wasiirku u arko in ay muhiim ama lagama-maarmaan u tahay dhaqan-gelinta ujeedooyinka sharcigan.

Qodobka 38^{aad}: Baabi'in

Sharcigani wuxuu baabi'inayaa Sharci iyo Xeer kasta oo ka hor-imaanaya ama aan la socon karin.

Qodobka 39^{aad}: Dhaqan-gal

Sharcigani wuxuu dhaqan-gelayaa markuu meel-mariyo Baarlamaanka JFS, isla markaana uu saxiixo Madaxweynaha JFS, laguna soo saaro Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.